# Jadeecada, qaamo qanshiirka, iyo rubeelada

## Waa maxay jadeecada, qaamo qanshiirka, iyo rubeelada?

Jadeecada, qaamo qanshiirka, iyo rubeelada (jadeecooyinka Jarmalka) waa cudur caabuq badan oo ka dhasha fayrasyo.

## Sidee dadku ku qaadaan jadeecada, qaamo qanshiirka, iyo rubeelada?

Jadeecada, qaamo qanshiirka, iyo rubeelada (jadeecooyinka Jarmalka) ayaa ku faafa u dhawaan shaha qofka caabuqa qaba.

## Waa maxay astaamaha jadeecada, qaamo qanshiirka, iyo rubeelada?

Jadeecada ayaa keenata qandho, qufac, indho guduudan oo xanuun badan, iyo finan.

Qaamoo qashiirka ayaa keena bararka qoorta iyo qandho.

Rubeellada (jadeecooyinka Jarmalka) ayaa keenta finan, qandho iyo bararka qanjirada. Haddii haweeneey uur leh ay qaado rubeela biloowga uurka waxey keeni kartaa ciladaha waa wayn oo ilmuhu ku dhasho.

Haddii 1000 qof qaadaan **jadeecada**

- 1 ama 2 qof ayaa dhimanaysa
- 50 ayaa qaadi doona caabuqa dhagaha
- 40 ayaa qaadaysa burukiito ama kolba-aariyo
- 5 ayaa qaadaysa murqo roor (fits)
- 160 ayaa qaadaysa shuban
- 1 yaa qaadaaya encephalitis (bararka maskaxda) 10 ilmood oo kasta oo uu ku dhaco encephalitis - 1 ayaa u dhinta halka - ilaa 4 ay yeelanayaan ciladaha maskaxda.

1 kamid ah 8000 carruur ah oo ka yar labo sano ayaa qaada SSPE (daciifida maskaxda), taasoo dhici karta sanado badan kadib jadeecada markastana waa loo dhintaa.

1 kamid ah 6000 oo qof ayaa qaadaysa dhibaatada dhiig xiranka.

Haddii 1000 qof qaadaan **qaamo qashiir**

- 50 ayaa qaadaysa fayraska meningitis
- 1 ayaa qaadaaya encephalitis (dhaawaca maskaxda)
- 400 oo rag ah oo qaba qaamo qashiirka ayaa xiniyuhu bararayaa

- 300 ayaa qaadi doontat qandho, madax xanuun, iyo bararka qanjirada calyada ee ka hooseeya jaqallada, iyo

1 kamid ah 20,000 ayaa noqonaaya dhagool.

Qaamo qashiirka ayaa marar dhif ah ma dhalaysnimo ku rida ragga.

Dadka ay ku dhacdo **rubella (jadeecada Jarmalka):**

- Ku dhawaad 1 kamid ah 2 qof ayay ku dhacayaan finan iyo qanjiro barar; halka in ka badan nus haweenka qaba rubeelada ay kala goysyadu xanuunayaan.
- 1 kamid ah 3000 ee qof ayuu ku dhacaa thrombocytopenia (nabarada ama dhiigbaxa maqaarka);
- 1 kamid ah 6000 ayuu ku dhacaa encephalitis (dhaawaca maskaxda);
- Haddii **haweeneey uur leh** uu ku dhaco rubeela biloowga uurka **9 kamid ah 10 kii ilmood** ayaa qabi doona ciladaha dhalashada **oo waawayn**, sida dhagoolnimo, indho la'aan, xanuunka maskaxda ama ciladaha wadnaha.

## Yay tahay inuu qaato talaalka MMR?

Talaalka MMR wuxuu ka difaacayaa qofka xanuunnada jadeecada, qaamoow-qashiirka iyo rubella (jadeecada Jarmalka). Waa talaal ka kooban fayras nool taasoo ka dhigan inay ku jiraan noocyada daciifka ah ee jadeecada, qaamo qashiirka iyo rubeellada.

Markii talaalka jadeecada laga bilaabay gudaha Ireland sanadkii 1985, tirada dadka ay ku dhacdo jadeecadu ayaa hoos ugasoo dhacay 10,000 sanadkaas ayagoo noqday 201 sanadkii 1987. Jadeecadu waa caabuq aad u faafa tirada dadka jadeecada qaba iyo dhibaatooyinka ka dhasha jadeecada ayaa degdeg u kordhaaya haddii carruurta aan la siin talaalka MMR.

Talaalka MMR ayaa lagu talinayaa in la siiyo ilmaha dhashay markay gaaraan 12 bilood.

Carruurtu waa inay qaataan kuurada labaad markuu ilmuhu gaaro 4-5 sano jir. Talaalkaan ayaa badanaa lagu siiya ilmaha dugsiga waxaana siiya shaqaalaha talaalka ee HSE laakiin meelaha qaar waxaa baxsha GP ga ilmaha.

Labo kuuro oo kamid ah talaalka MMR ayaa loo baahan yahay si loo siiyo ilmaha difaaca ugu sareeya.

Carruurta qaar ayaa gafi kara labada kuuro ee talaalka MMR tan ayaana keentay in dhawaan ay dilaaceen qaamo qashiirka iyo jadeecada.

Carruurta waawayn iyo da'yarta qaangaarka ah ee aan dhamaysan (ama aan hubin inay dhamaysteen) labadooda kuuro ee talaalka MMR waa in degdeg loo talaalo.

## Carruurta waawayn iyo da'yarta qaangaarka ah ma qaadan karaan talaalka MMR?

Ma jiro xili kama danbays ah in la qaato talaalka MMR, waxaana lagu talinayaa in carruurta waawayn iyo da'yarta qaangaarka ah ee aan qaadan labada kuuro ee talaalka MMR (ama aan hubin inay qaateen) ay qaataan talaalka sida ugu dhakhsaha badan.

## Yay tahay inuusan qaadan talaalka MMR?

Talaalka MMR ayaa badqab u leh inta badan dadka.

Hase yeeshee, adiga ama cunugaagu waa iniinaan qaadan talaalka haddii aad xasaasiyad xun (anaphylaxis) ka qaadeen talaalkii hore ee MMR ama qayb kamid ah talaalka (ayna ku jirto gelatin - oo ku jirta talaalka MMRVaxPro MMR keliya) ama xasaasiyada daran oo ku aadan anti-biyootiga loo yaqaano neomycin.

Talaalka MMR waa inaan la siin qof uur leh.

Waa inaad dib u dhigtaa qaadashada talaalka MMR haddii cunugaagu:

- uu qabo qandho
- uu qaatay talaalka furuqa ( busbuska), afartii asbuuc ee lasoo dhaafay gudahood.
- uu qaato daawooyinka steroids oo kuuro sare ah uu qaato wax daawayn ah oo la xiriirta chemotherapy ama radiotherapy
- 
- uu qabo xanuun ama cudur saamaynaaya difaaciisa jirka
- dhawaan lagu shubay dhiig ama qaybaha dhiiga

Haddii cunugaagu qaato wax kamid ah daawooyinka kor ku qoran waa inaad talaalka kala hadasho dhakhtarka cunugaaga.

Haddii nidaamka difaaca ee qofka ay saamayn xun kasoo qaarayso cudurka ama daawada, ma awoodi doono inuu qaato talaalka MMR.

Haddii aad qabto wax walaacyo ah, la hadal dhakhtarka qoyskaaga ama kalkaalisada caafimaadka dadwaynaha.

## Ma tahay in cunugaygu qaato talaalka MMR haddii uu xasaasiyad kuq abo ukunta?

Haa - talaalka MMR ayaa la siin karaa carruurta xasaasiyada xun ku qaba ukunta. Xasaasiyada daran ee talaalka MMR ayaa aad dhif u ah xataa haddii carruurtu xasaasiyad xun ku qabaan ukunta. Muhiim maaha in la iska ilaaliyo talaalka MMR haddii cunugaagu neceb yahay ukunta ama uu shuban ama calool xanuun ka qaado cuista ukunta umana baahnid inaad qaado wax talaabooyin taxadar gaar ah. Haddii aad qabto wax shaki ah, kala hadal dhakhtarka ama kalkaalisada siinta ilmaha talaalka MMR.

## Ma jiraa xariir u dhexeeya talaalka MMR iyo autismka ama xanuunka mindhicirka?

Waxaan ognahay in talaalladu aysan sababin autism, sonkoroow, noocyada badan ee sclerosis, xasaasiyadaha, neefta ama xanuunka maskax faluuqa (garaad yarida). Hase yeeshee, marka waxyaabo dhacaan xiliyada talaalka la qaato waxaan aamini karnaa in xiriir u dhexeeyo labada arimood. Tusaale, astaamaha autismka ayaa badanaa la ogaadaa ku dhawaad da'da marka carruurta la siiyo talaalka MMR, laakiin talaalku ma sababo cudurka. Inta badan carruurta ayaa leh difaac ka dhan ah caabuqa, sidaas awgeed carruurta qaba iyo kuwa aan qabin xanuunnada sida autismka, neefta ama maskax faluuqa ayaa ayaguna qaadan kara isla talaallada.

30-kii sano ee lasoo dhaafay, in ka badan 500 oo milyan oo kuurooyiinka talaalka MMR ah ayaa lagu baxshay in ka badan 90 wadan. Khubarada daafaha caalamka ayna ku jiraan World Health Organization (Ururka Caafimaadka Aduunka), ayaa isku raacay in aysan jirin wax xiriir ah oo u dhexeeya talaalka MMR iyo autismka ama xanuunka dhaawaca mindhicirka.

Daraasaad lagu sameeyay si loo hubiyo in carruurta leh difaaca buuxa ay u badan yihiin inay qaadaan cuduradaan ayaa muujiyay inaysan jirin wax xiriir ah oo u dhexeeya xanuunada iyo talaallada. Cilmi baaris adag oo lagu sameeyay talaalka MMR, oo quseeya kumanaan carruur ah, ayaa lagu sameeyay UK, Maraykanka, Sweden, iyo Finland. Cilmi baaristaan ayaa muujisay inuusan wax xiriir ah ka dhaxeyn MMR iyo autismka. Cilmi baaris ayaa eegtay diiwaannada talaalka ee cunug kasta oo ku dhashay Denmark lagasoo bilaabo 1991 ilaa 1998 (in ka badan nus malyuun carruur ah). Intii lagu jiray waqtigaas, 82% kamid ah carruurta ku dhashay Denmark ayaa qaatay talaalka MMR. Cilmi baareyaasha ayaa ogaaday in khatarta autismka ay u sinayd ilmaha qaatay talaalka iyo ilmaha aan qaadan talaalka.

Gudiga Caafimaadka Guud ee UK ayaa bishii Maayo 2010 go'aamiyay in Dr Andrew Wakefield laga saaro diiwaanka caafimaadka kadib markii lagu helay inuu ku kacay falal wax isdabo marin xirfadeed ah oo daran iyo musuqmaasuq la xiriira cilmi baaris uu ku sameeyay carruurta. Dr Wakefield ayaa u adeegsaday natiijada cilmi baaristaan si uu fasiraad been ah uga baxsho xiriir ka dhexeeya Talaalka MMR iyo autismka.

Ururo badan oo xirfadeed oo xoogooda iskugu geeyay raadinta daawo loo helo autismka ayaa daabacay bayaannada mowqifkooda la xiriira autismka iyo talaallada.

Autism Speaks (2015), ururka ugu wayn ee saynista iyo u qareemida dadka autismka qaba ayaa sheegay.

“Intii lagu jiray labaatankii sano ee lasoo dhaafay, cilmi baaris aad u badan ayaa lagu sameeyay in wax xiriir ah u dhexeeyo talaallada carruurnimada hore iyo autismka. Natiijooyinka cilmi baaristaan waa cadahay: Talaalladu ma keenaan autismka. Waxaan ku boorinaynaa in dhammaan carruurta si buuxda loo talaallo”.

## Waxa aad filanayso marka aad qaadato talaalka MMR?

Kadib qaadashada talaalka, cunugaaga ayaa dareemi kara xanuun, gaduudasho ama barar ka fuula meesha cirbada looga dhuftay. Waxaa laga yaabaa inay cuncunto uuna qandho leeyahay.

Haddii sidaan dhacdo waxaad siin kartaa sharoobada ilmaha ee paracetamol ama ibuprofen. Waa inaad soo kale siisaa biyo badan. Xaqiiji inauusan aad u diiranayn iyo inaan dharku xoqayn meesha cirbada looga muday.

Ilmaha ayaa caadiyan kasoo bogsooda ciladahaan fudud maalin ama labo gudahood

Dadka talaalka buuxa qaba:

- 1 kamid ah 10 kii qof ayaa daremaaya xanuun, gaduudasho ama barar ka fuulaaya meesha cirbada looga dhuftay ama qandho yeelanaaya
- 1 kamid ah 20 kii qof ayay ku dhacayaan finan lix ilaa 12 maalmood kadib (kuwaani maaha kuwo faafa)
- 1 kamid ah 20 kii qof ayay ku dhacayaan qanjiro barar, qoor xanuun, ama xanuunka kala goyska
- 1 kamid ah 100 kii qof ayaa qaadeysa bararka qanjirada calyada ee ka hooseeya jaqalka asbuuca sadexaad kadib talaalka (maaha xanuun faafaaya)
- 
- 1 kamid ah 1000 qof ayuu ku dhacayaa murqo roor (fit).
- 1 kamid ah 22,000 oo qof ayaa qaadaysa dhibaatada dhiig xiranka / nabarada ama dhiigbaxa mudada kooban
- 1 kamid ah 10,000,000 ayuu ku dhici karaa encephalitis (dhaawaca maskaxda).

Ciladaha daran ayaa aad dhif u ah.

## Haddii ay cunugayga ku dhacaan jadeeco/qaamo qashiir fudud, miyuu faafin karaa cudurka?

No.

Talaalka MMR ma kaydiyo cudurka, sidaas awgeed ma jirto khatarta faafinta jadeecada kadib talaalka. Ma jirin wax warbixinno ah oo sheegaaya in dadka talaalka qaba ay caabuqa ku faafiyaan dadka kale.

Aad ayay muhiim u tahay in cunug kasta uu qaato talaalka MMR xiliga saxda ah si uu u helo difaac ka dhan ah cudurka jadeecada, qaamo qanshiirka, iyo rubeelada.

## Sidee talaalka MMR u shaqeeyaa?

Talaalka ayaa shaqeeya asagoo u sahla nidaamka difaaca jirka inuu dhiso difaac ka dhan ah cuduradaan.

## Waa sidee saamaynta talaalka MMR?

Koorsada buuxda ee talaalka MMR ayaa difaac adag ka siinaysa jadeecada 99% kamid ah dadka, ka difaacayda Rubella (Jadeecada Jarmalka) 99% dadka kana difaacaaya qaamo qashiirka 88% dadka.

## Wixii xog dheeraad ah

La hadal xirfadle caafimaad oo aad ku kalsoon tahay oo booqo www.immunisation.ie